

Ramadaanka iyo daryeelka qaaxada (tiibishada)

Ramadaanku waa af ka haysashada wax cunista iyo cabistaba. Waxaana soonka bisha uu ku waajib yahay qofka muslimka ah, qaangaarka ah, islamarkaana caafimaadka qaba.

Ma soomi karaa inta uu i hayo xanuunka qaaxada ama tiibishada?

Qofka qaba cudurka qaaxada ama tiibishada ma soomi karo. Qaaxada ama tiibishada waa in loo qaataa daawo joogto ah, taasoo qofka lagu ilaalinaayo qaadashadeeda. Qaar ka mid ah daawooyinka tiibishada lama qaadan karo iyadoo calooshu ay qofka maran tahay, waayo waxaa ay dhibaato ku tahay sidii ay daawadu jirka ula falgeli lahayd, waxaana arrinkaas uu hoos u dhigayaa ama daciifinayaa awooddii daawada. Daawada oo la qaadan waayana waxaa ay khatar ku keeneysaa daryeelka qaaxada ama tiibishada, waxaana ay kordhinaysaa khatarta ah in cudurku uu sii adkaado, islamarkaana awooddii daawadu ay meesha ka baxdo, waana sababtaas mida keentay in aan la soomi karin, inta uu qofku qabo cudurka qaaxada ama tiibishada. Soonka bisha Ramadaan waxaad soo gudi kartaa marka aad caafimaaddo kaddib.

Sidee baan u soo gudi karaa soonka la igu leeyahay, sideese loo sameeyaa?

Maadaama uu soonku ka mid yahay tiirarka islaamka, waa in sida ay diintu dhigayso maalmihii soonka ramadaan ee qofka ka tagay uu soo guda. Waana in uu qofku soo guda in le'eg intii maalmood ee soonka ka tagtay.

Haddii qofku uusan marnaba awoodin inuu soo gudo soonkii lagu lahaa xaaladdiisa caafimaad oo aad u liidata awgeed (xitaa bilaha uu maalinku yar yahay ee waaguna goor dambe dillaaco, qorraxduna ay waqtiga hore dhacdo), waxaa qofkaas uu quudinayaa halkii maalin ee walbaa hal qof oo miskiin ah, sidaas ayuuna ku soo gudayaa soonkii lagu lahaa.